



UJEEDO: WAQAF DHUL BANAAN OO DHAN 4, BOOS OO KU YAAL XAMAR DEGMADA HODAN.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 09/11/2022, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAQFE:- DAAHIR CALI JIMCAALE, Somali ah, Hooyo: Xaawo Guure Jaamac, Ku Dhashay: Cadaado, Sanadkii: 1948, Degan Muqdisho, Sita: W.A.L. NO. 000116623	LOO WAQFE:- MASJID BEYTULLAAH OO AY LEEYIHIIN DHAMAAN UMADDA MUSLIMIINTA AH EE SUNNIYIINTA AH
TILMAAMAHA DHULKA LA WAQFAAYO Dhul Banaan oo Ku yaal: Muqdisho , Degmada: (Hodan) , Cabirka: (27X27)-M , Looto No: 89,90,91,92- , W.M.L: (44849/93) , Tr. 24/12/1993, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Maxamuud Xuseen Diirshe	SOOHDINTA DHULKA Bari: jid , Koonfur: Jid , Galbeed: Jid , Waqooyi: Jid

B- Aniga oo ah **DAAHIR CALI JIMCAALE**, Waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka fiyow in aan waqfay Dhulkayga banaan oo aan anigu Milkiyadiisa Leeyahay tilmaamihisu sare ku xusan yahay, Una Waqfay in Laga Dhiso **MASJID BEYTULLAAH**, Waxaana Afarta Boos Labo Ka mid ah, u Waqfay Xaaskeygii Allaha u Naxariistee **Xaliimo Barre Isaaq** Labada Boos Cabirkooda Waa 27X13,50.M Looto.l.r.91-92, Soodimihisuna Kala Yihiin Koofur, Waqooyi iyo Bari Waxaa Ka Mara Jidad Sidoo Kale Labada Boos ee Soo Hartay Waxaan u Waqfay Nafteeda Labada Boos Cabirkooda Waa 27X13,50.M Looto.l.r.89-90, Soodimihisuna Kala Yihiin Waqooyi, Galbeed iyo Bari Waxaa Ka Mara Jidad, Waxaan kale oo aan Cadaynayaa in Dhamana Afartaas Boos ay ka madax banaan yihiin rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara waqafkaan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Dhulkaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, dukuminti been abuur ah, ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah aniga ayaa Mas'uul Ka ah.

T- Anaga oo Kala ah Kamaal Daahir Cali & Ismaaciil Daahir Cali Waxaan Cadaynaynaa in aan Markhaatiyaal iyo Goob Joogba Ka nahay Waqafkaan.

J- ASALKII HORE: 1)Wuxuu Dhulkaan Asalkiisa Damaanyaale ah, Ku Soo Baxay Saciid Cusmaan Aadan Sanadkii 1983, Wuuna Lumay Waxaa Loo Soo Sameeyey Duplicate Lehna Warqad Siin Dhul DH/MG/GGDM/ 01/15/016, Tr.20/10/2016, D/hoose ee Xamar Waaxda Dhulka Rasmiga, Cabirka Guud (27X27)-M Looto No 89,90,91,92-, iyo 2)Asal Munchipalle Saciid Cismaan Aadan RL:- 3548, Tr. 26/07/2016, Sabarlog No: 61/48/2016, Tr. 26/07/2016, Kana Soo Wada Baxeen D/H ee Muqdisho Cabirka (27X27)-M Looto No 89,90,91,92-.

FIIRO GAAR AH:
Waxaan kaloo cadaynayaa in Dhulkaan aan waqfay ee aan kor ku soo xusay aan la gadi Karin, lana hibeyn Karin, lana rahmi Karin, Lana Dhaxli Karin.

SAXIIXA WAQFAHA DHULKA

DAAHIR CALI JIMCAALE

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- KAMAAL DAAHIR CALI



2- ISMAACIIL DAAHIR CALI



(XAFIISKA NOOTAAYAHA)


REP. 414/T.P.N/22, Tr. 09/11/2022, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- Daahir Cali Jimcaale** Ahna (Waqfe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Waqafkaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

By: Cirro



Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo"



MASAWIRKA WAQAFAHA

DAAHIR CALI JIMCAALE



MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA

KAMAAL DAAHIR CALI

ISMAACIL DAAHIR CALI



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال


SOMALI REPUBLIC

WARQADDA AQQOONSIGA

البطاقة الشخصية

IDENTITY CARD

000116623



Magaca / الاسم / Name

DAHIR
ALI JIMALE



Taariikhda dhalashada / تاريخ الميلاد / Date of Birth

01 JAN 1948

Meesha dhalashada / مكان الميلاد / Place of Birth

ADADO



Taariikhda la bixiyay / تاريخ الاصدار / Date of Issue

09 APR 2013

Lab/Dhaddig / الجنس / Gender

MALE

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO GURI = = = = =

Muqdisho, Maanta oo aay taariikhdu 23ka Bishaan Dic
eembar ee Sannadka 1993. (24/12/1993), Anigoo ah MARYAN
CALI XAAJI, oo Soomaali ah, kuna sugan Kamar Wkana Wa-
akiil ah Ninkeeda La Yiraahdo SACIIDI CUSMAAN AADEN
Kuna Sugan Kismaayo Gobolka J/Hoose, Waxaan qoraalkaan
Ku Cadeynayaa in aan ka gadey Gurigan oo ku yaalo
Magaladan Muqdisho, Degmada Hodan oo cabirkiisu uu
Yahay 27X27, agagaarka Warshadda Caanaha Soohdimahii-
suna kala yihiin, BARI, Waxaa ka xiga G/Sare Abuukar,
GALBEED, waxaa ka xiga Guri Dad leeyahay, KOCNFUR, wax-
aa ka xiga Jid, WAQOQYI, waxaa ka xiga MID; Waxaan ka
Gadey kuna Wareejiyey ~~Kuna~~ DAAHIR CALI JIMCAALE, oo
Soomaali ah oo deggan Kamar oo Ganacsade ah. = = = = =

Waxaa halkan ku lifaqayaa qoraalka Taariikhdu aay
Tahay 611/93, kuna saxiixan yahay SACIIDI CUSMAAN AADEN
Isla markaana Waxaa sii Xaqiijinaya in Awooda la i sii-
yey Labada Marqaati ee Soomaliyeed Lana kala yiraahdo;-
MAXAMED AADEN DALAB, iyo BASHIIR XASAN YUUSUF, oo lab-
duba deggan Kamar, ka dib markuu kula soo hadley Taarka
la yiraahdo halow halow. = = = = =

Maadaama aan waqtigan xadirka ah gacanta lagu heynin
Dokumentigii ama qoraaladii Guriga ee la Kiriirey Mi-
lkiyadda Waxaa Marqaati ahaan halkaan ku cadeynayo

In Gurigu yahay Milkiga SACIID CUSMAAN AADEN, Labada

Qof ee ragga ah ee la kala yiraahdo CABDULAHI XAASHI

BARRE, iyo CABDI JUMCAALE AFRAK, iyo Labada Dumarka ah

ee iyana, lakala yiraahdo FAADUMO KEYLE SIYAAD, iyo

FAADUMO AXMED FAARAK, Afartuba Soomaali ah deggan Xamar,

ahna Jiiraankii Aqalka, = = = = =

Anigoo ah MARYAN CALI XAAJI WARSAME, Waxaan qoraalkan

ku Cadeynayaa in qoraalkii tilmaamayey aay Lumeen ka

Dib Markii Dhibaataadu ka dhacdey Xamar, Saas darteed

Haddii aan hele Waqti kastaba ha noqotee waxaan ku soo

simi doonoo ama gacanta u gelin doonaa La wareegaha

Aqalka DAHIR CALI JIMCAALE, = = = = =

Qoraalkaan ka kooban Bogga Koowaad ilaa halkaan waxaan

hoirayaa in aaysan jirin Cid igu qasabtey ama awood

in saartey ama igula talissey balse uu yahay mid aan

Caa'ilad ahaan u go'aansaney. = = = = =

Isla markaana Waxaan qoraalkaan ku cadeynayaa in marki

aan saxiixayey Heshiiskaan aan caafimaad qabey, Mask-

axdeydu Taam aheyd waxgaradkeyguna Kaamil ahaa. = = = = =

Ka Dib markii si wanaagsan aan u agrisaney ayaan halkan

Hoose wada saxiixney. = = = = =

Wixii taariikgda maanta ah wixii ka danbeeya Guriga aan

Ker ku tilmaaney iyo ~~Guriga~~ Dhulkatu ka dul dhisan

Yahayba Wuxuu noqonayaa Milki u gaar ah DAHIR CALI JI-

CAALE, iyadoo aysan jirin Cid kale oo wax ku sheegan

R. 414/TPD/22

T. 9/11/22

27 x 27. M

L. 89, 90, 91, 92





Si toos ah ama si dhaban. = = = = =
Qimaha aan ka siisaney Guriga iyo Dhulka uu ka dul
dhisay yahay Waa Shs. 38,000,000/= (Sadaan Iyo Skideediy
salyan = = = = =
Qoralkan kama koobna Bog iyo bar sida aan kor ku til-
maney balse Wuxuu ka kooban yahay Labo Bog ee Buuxda
iyo Ilaa halkan. = = = = =

Muqdisho. 24/12/1993.
1) MARYAN CALI KAAJI WARSAME,
2) DAHIR CALI JIMCAALE,

MARQAATIYAAL

- 1) MAXAMUUD AADEN DALAB,
- 2) BASHIIR KASAN YUSUF,
- 3) CABDI JIMCAALE AFRAX,
- 4) CABDULAHI KAASHI BARRE,
- 5) FAADUMO KEYLE SIYAAD,
- 6) FAADUMO AXMED FAARAX,

KAFIILKA NOOTAAYAHA XAMAR

REP.N. 111849 SAXIIXA LA SUGEY

Anigoo ah Dr. MAXAMUUD KUSEEN DIIRSHE, Nootaayp Xamar
ah Waxaan cadeynayaa in saxiixyadaan kor ku qoran in
aay Yihiin Kuwii runta ahaa ee MARYAN CALI KAAJI WA-
RSAME, ku dhalatey Xamar 1947⁶⁵, Paasaboer n, A0665718, iyo
DAHIR CALI JIMCAALE, ku dhashey Xamar oo Soomaali ah
oo deggan Xamar, iyo Maxamuud Aaden Dalab, Ku dhashey



Gaal kacyo 1944tii, degan xamar Gaacsade ah.
 iyo BASHIIR KASAN YUUSUF, ku dhashey Gaalkacyo 1957dii
 degan xamar ah Pasaboor. D. 588542.
 Iyo CABDI JIMCAALE AFRAX, ku dhashey Ceel Buur 1946dii
 degan xamar ah Xoogsade,
 iyo CABDULAHI KAASHI BARRE, ku dhashey Xamar 1949, oo
 Lehna W, aq, Lam, 146932, ee D.H. ee Xamar. = = = = =
 Muqdisho. N O O T A A Y A H A .

=(DR. MAXAMUUD XUSEEN DIIRSHE)=





[Handwritten signature in blue ink]

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

UJ EDO:- CADDEYN HESHIIS KALA GADASHO GURRI

Muqdisho, Maanta oo ay taariikhdu tahay 24/12/93. Wniga oo ah Maryan Cali Xaaji, Soomaali ah, Waxaan Heshiiskan ku cadeynayaa in Qiimaha dhabta ah ee aanu ku kala iibsaney Guriga aanu leenahay Reer Said Osman Adan, oo aan anigu iibiyey isaguna raali iiga yahay Waa SH.S0. 38,000,000/= Sodon iyo Sideed milyan oo ah shilin Soomaali, Lacagtaas oo dhamaanteed uu gaxanta iga wada saaray Daahir Cali Jimcaale, oo ah Mulkiilaha hada la Wareegey Guriga, kuna yaala Degmada Hodan Magaalada Muqdisho, Lacagtaas oo aan qaatay iyada oo aysan waxba ka maqneyn.

Muqdisho 24/12/93.

- 1)- MARYAN CALI XAAJI, (IIBISO)  MR
- 2)- DAAHIR CALI JIMCAALE, (IIBSADE) 

XAAFIISKA NOTAAYAHA MUQDISHO

Rep. 44850

SAXIIXAYADA LA SUGAY

Anigoo ah Notaayo Maaxamuud Xuseen Diirshe Waxaan Cadeynayaa in saxiixyada kor ku qorani ay yihiin Kuwii dhabta ahaa ee Maryan Cali Xaaji, kudhalatay Xamar 1965tii leh Pasaboorka L; A065718, iyo midkii Daahir Cali Jimcaale, ku dhashay Xamar 1950kii degan xamar oo Qoraalkan kala qaadashada lacagta ah ku saxiixay Xaafiiska hortiisa,

NOTA AYAH

Dr:-- MAXAMUUD XUSEEN DIIRSHE



38,000,000/- So far the ...
... ..

- 1) - ... (LISIB)
- 2) - ... (LISIB)

... ..
... ..
... ..
... ..
... ..

اوصاف حامل الجواز
DESCRIPTION OF HOLDER

Shaqadiisa Business Man
 Occupation
 Magaca Aabbaha Osman Adam
 Father's name
 Magaca Hooyada Halima
 Mother's name
 Meesha uu ku dhashay Mozadish
 Place of birth
 Taariikhda uu dhashay 1947
 Date of birth
 Meesha uu deggan yahay Mozadish
 Domiciled at
 Degmada Mozadish
 District of
 Dhererka 4-70 m
 Height
 Dhismaha jirka no mal
 Build
 Indhaha Black
 Eyes
 Midabka Black
 Complexion
 Calaamado ny
 Significant marks



Jadumo Said Isman
 2-9-88 Daugh
Mariam Ali Haji
 Wanbame 1965 Wife
Asi said 16/4/78 Daughter

Waxaa lagu qori karaa carruurta da'doodu ku
 siran tahay 14 sano.
 يمكن تسجيل أسماء الأطفال إلى سن 14 سنة فقط
 Only names of children upto 14 years of age can
 be entered.

DAL-KUGAL
الناشيرات
VISAS

Acompagné de son épouse
et ses deux enfants
DAL-KUGAL
الناشيرات
VISAS

REPUBLIQUE DE DJIBOUTI
POLICE NATIONALE

Nom : SAN OSMAN

Prénoms : ADAM

1. Numéro du visa : 4365/PN

2. Genre de visa : PCU


3. Date de délivrance : 21/04/1992

4. Date d'expiration : 20/07/1992

5. Nombre de voyages autorisés : Aller - Retour

6. Durée autorisée de chaque séjour : 3 mois

A Le Directeur de la Police Nationale





15/12/16 Duplicate Daminyale

DOWLADDA HOOSE EE G/BANAADIR

729mQ **Lacag Qabasho Guud**

Taariikh: 10/17/12/16 ⁶²⁸⁷

Mudane: Saciid cawisay Adam

Lacag Dhan: **Sh.So** 6400 **USS** 25-20

Qoraal ahaan. lix msk 17-17 > Ah & Bsk 1 km

Sabaabta: Duplicate

Qabtaha

Saxiixa Lacag Qabtaha





ASAL'00135

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
DOWLADDA HOOSE EE XAMAR
WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
SIIN DHUL**

Iyadoo la arkay ogaansihii Guddiga ee _____
Marka Taariikhdu ahayd B,I,6287 Kuna Saabsanayd naqshadii
dhismaha oo u keensaday 10/7/2019
Mud/marwo Saciid Gusmaan Aadan
kaasoo horay u soo weydiistay gabal dhul dhismood ah oo ku
yaal Muqdishu Degmada Hodan wadada _____

Iyadoo la arkay warqadii tiradeedu ahayd DH/MG/GGDM/01/15/2016
oo waaxda Dhulka Rasmiga ah taariikhduna ahayd 20/10/2016
laguna amraayey xafiiska Waaxda dhulka Rasmiga ah inuu
wareejiyo dhulka Ujeeddada ku qoran.

Sanadkii Laba Kun Toban & Sagaal

Maalintii 10 ee bishii Luuliye 2019

Jom _____

ee ka tirsan xafiiska Waaxda dhulka Rasmiga ah u amarayna
maamulaha waaxda.

waxuu tegey meeshii dhulka ku yiil, sidey caadadu ahaydna isagoo jooga qofkii la siinayey dhulkaas waxaa la tusay geesihii tasoo wafaqsan qorshaha magaalada :

waxayna u egtahay sida soo socota :

Waa Gobal Dhul Dawladeed ah ee ku yaala Degaaladan Muqdisho

Deg, Hedan qaabkiisuna yahay Afar Gees Adimihiisuna yihiin

27X27 lana mid ah 729 MQ. Soohdimihiisuna yihiin sidstan,

Waqooyi waxaa ka Xiga Wadde

Koofur waxaa ka Xiga Wadde

Galbeed waxaa ka Xiga Waddada Lenin

Bari waxaa ka Xiga Wadde.

Si lagu caddeyo qaabka iyo caddada dhulkaas waxaa lays xasuusinayaa in laga arki karo naqshadda ku dhegan warqaddaan isagoo jooga waydistihii waxaa loo soo mudey 4tii gees ee dhulkaas, waxuuna caddeyey inuu raali ka yahay.

In kastoo siinta ay xeerar ku xerayso. Dowladda Soomaaliyeed waxba uma raacan karto illa iyo inta ay ka bixineyso " Amar Xeer " dhismo.

Xaashidaan siismada dhulka waxaa laga sameynayaa 3 nuqul oo la kala siinayo : Danayaha. Waaxda Dhulka Rasmiga ah iyo Qaybaha Dhismaha Dowladda Hoose ee _____

Jiom. Dhiibay Dhulka

Qofka la siiyay Dhulka

Agaasimaha Waaxda Dhulka Rasmiga ah





[Handwritten signature] 13/7/019

TILMAANTA DHULKA



<p>Gurushada Sananada</p>	<p>Duuliyey - save Guuleed</p>	<p>Duuliyey - save Guuleed</p>	<p>warshada - lol mada</p>
-------------------------------	------------------------------------	------------------------------------	--------------------------------

wadada Linnin



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
=WAAXDA DHULKA RASMIGA AH=

MUQ.10/7/2019

Waxaa la Caddeynayaa in Nuqulkaani uu la mid yahay Asalkii
ee Lunay Kuna see Baxay Saciid Cismaan Aadan Ieeguna Naadiyey
Faafinta Rasmiga ah ee Lamb. yahay 8 seena baxday 19/8/1983
haddana lagu Ogalaaday Wargadda Lamb. yahay DN/MG/GGDM/01/15/016
ee 20/10/2016 wuxuuna leeyahay Gal Lamb.135/2019.

Wabillaahi Tawfiiq.

(Mudane Maxamed Kasan Cumar)

=Agaasimaha Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose=



Handwritten signature and date: 13/7/2019



3254/07 Duplicate Hodan

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

27x27 WAAXDA DHULKA

L: 89-92

Xaashida lacag Qabashada No.: 3548

Mud / Mar. Siciid Cismaan Aadan

Waxaan ka qabtay Sh. So. 600,000 (lax Boqol

kun Sh-50)

oo ah Duplicate

Muqdisho 26-7-2016

B-Qofka Lacagta Bixiyay
T-Maamulka Lacagta
J-Nuqul ku haraya Boloogga



Saxiixa Lacag qabtaha




**DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
WAAXDA DHULKA**

No.: 3548

Soo Gelidda Warqadda

Tirsi : 3548

Taariikh: 26-7-2016



Bollettario No.: 61

Bolletta No. : 48

Sannadka : 2016

WARQADDA LAHAANSHAHA DHULKA

Mud / Mar.: Sikiid Cismaan Aadan

Og.: Tal. Ciidaanka Boliska Dawladda Hoose Muqdisho - Xamar.

Mudanaha / Marwada kor ku qoran waxaa loo oggolaady inuu / iney dhisto Cariish, Baraako ama

Guri Dhagax ah 27 X 27 oo uu ka dhiso cad dhul ah oo

le'eg Deg-Curi kuna yaal Xaafadda Hodan Soohdintiisuna tahay 89,90,91

X. Woqooyi _____ X, Galbeed _____ X, Bari 92

iyo Koofur _____

Warqaddaan xaq waxaad ugu leedahay muddo laba iyo toban (12) bilood ah oo maanta

Ka billaabmanta, fasax la'aan inaad dhulka dhistid.

Warqadda lacag qaabashada No. 3548 ee 26-7-2016

Muqdisho, Taariikh 26-7-2016

Agaasimaha Waaxda Dhulka

Duqa Magaalada

Ujeeddo: DAMAANAD QAAD WAKAALAD GAAR AH



Xafiiska Notayaha Faaruuq Muqdisho KM4, Waxaa Hortiisa yimid Damiinka kala ah:
1. Daahir Cali Jimcaale ku dhashay Cadaado 1950, hooyadiisna la yiraahdo Xaawo Guure Jaamac, leh aqoonsiga warqad ah ku dhegan daganna Muqdisho Soomaaliya.
2. C/laahi Axmed Cali "Faaf" Ku dhashay Muqdisho 1965 Hooyadiisna la yiraahdo Saynab Cali Siyaad, hadana dagan Muqdisho Somalia Waxay cadeeyeen in ay damiinumaal ka yihiin wixii ka yimaada wakaalad uu soo qoray: **SICIID CISMAAN AADAN**, dagan dalka Kenya, wuxuuna soo wakiilatay: **MARYAN CALI XAAJI** Dagan Muqdisho sida ku cad wakaalad Tr.06.11.1993, waxay damiin ka yihiin sida haddii uu noqon waayo qofkii dhabta ahaa ee wakaaladda soo qoray iyo qofkii dhabta ahaa ee la wakiishay, ama wixii ka yimaada jiritaanka wakaaladdaas, damaanadaas waxay bixiyeen ayagoo caafimaad qaba, maskaxdodu fiyowdahay cid qasabtayna yasan jirin la wakiishaha oo loo soo wakiishay Wakaalad Gaar ah, kuna saabsan dhul ku yaalla Deg. Hodon Muqdisho xaafadda warshadda caanaha, cabir dhul **27x27 mitir**, soohdiimiisuna kala yihiin **Galbeed Jid, Waqooyi Jid, Koofur Jid, Bari** dhulka Colonel Abukar, la wakiishaha waxaaa awood buuxda loo siiyey inay gadi karto, ijaari karo, dhisi karo, u dacwoon karo, Qareen u Qaban karo, Maxkamadda Horteeda waa haddii loo baahdo, isla mar ahaantaas la wakiishuhu wuu aqbalay wakaalashadaas iyo wixii ka yimaada, wixii ka yimaada Damaanaqaadka wakaaladan anaga Damaanadqaadayaasha ah ayaa ka masuul ah si sharci ah. -----

Saxiixa iyo Magacyada Damiinka wakaalada

1. Daahir Cali Jimcaale..... 1. C/laahi Axmed Cali "Faaf"

REP No. 11688/KM4/2018 XAFIISKA NOTAYAHA FAARUUQ MUQDISHO TR.30.12.2018
SAXIIX LA SUGAY

Anigoo ah Dr. Cumar Maxamed Faarax Nootaayaha Faaruuq ee Muqdisho Waxaan Caddaynayaa in saxiixyada kor ku qoran ay yihiin kuwii runta ahaa ee Damaanad bixiye-yaasha: 1. Daahir Cali Jimcaale iyo 2. C/laahi Axmed Cali "Faaf" waxaan cadaynaynaa inaan damiinumaal buuxa ka nahay wixii ka yimaada wakaalada kor ku xusan. -----

NOOTAAYAHA
DR. CUMAR MAXAMED FAARAX "GOMOD"



Ref No. 89 /2019 B.G

Tr.24.02.2019

Wakaaladda halkan ku qoran waa ansax waafaqsan shareecada islaamka iyo nidaamka garsoorka ee Soomaaliya, waxaana loogu dhaqmayaa si sharciga waafaqsan, maxkamaduna waxay ku qortay diiwaanka guud ee mucaamilaadka. -----

Garsooraha Maxkamadda
Degmada Wadajir
Dr. Maxamuud Xasan Hilowle



D. Taariikh 6/11/1993.

UJKEDDO: Wakaalad Gaar ah.

Anigoo ah SAGIID CUSMAAN AADEN, Soomaali ah, aqoonsi Passaport n. A0667518 Taariikh 17/4/1991.

Waxaan qoraalkan ku Caddaayayaa inaan Wakiishay gabadha laaytrahdo MARYAN CALI XAAJI - deggan Xamar, waxaan u Wakiishay gurigeeyga VILLA ah ku yaalla Magaala Madaxda Xamar Xaafadda HODAN (Deg. HODAN) Warshadda Caanaha gadaashada, ku fadhya dhul dhan Mitir 27 X 27 - SOHDINTIISA:

- 1- BARI Collenello Abuukar,
- 2- GALBEED Jid
- 3- KONFUR Jid
- 4- WAQOOWI Jid

Wakiilka waxaa la siiyey awood buuxda ah inay Maamusho, Kireysato, ka Saari karto dadka guriyaha ku jira, Dayaactiri karto, tibin karto, haddii dood iyo dacwo noqoto qaabili karto, Qareen ii Magacaabi karto, iyadoo Mataleyso Magaceyga iyo Mas'uuliyaddeyda meesha aniga ka maqan.

Wakiilka way aqbashay Xil gudashada oo waafaqsan Shareega Islaanka iyo qaynuunka.

CADDEYEBY MILKIILAHHA GURIGA
SAGIID CUSMAAN AADEN

AQBAL AHAAN WAKIILKA
MARYAN CALI XAAJI

MARKHAATIYAAL :

- 1- MOXAMED DIRIYE GUULEED
- 2- CABDULLAHI CALI GUULEED
- 3- MOXAMED CIIMI (INDHA MALEH)

D. Taariikh 6/11/1993.

UJEEDDO: Wakaalad Gaar ah.

Anigoo ah SAGIID CUSMAAN AADEN, Soomaali ah, aqoonsi Passaport n.A0667518 Taariikh 17/4/1991.

Waxaan qoraalkan ku Caddseynayaa inaan Wakiilshay gabadha laytraahdo MARYAN CALI XAAJI - deggan Xamar, waxaan u Wakiilshay gurigeyga VILLA ah ku yaalla Magaala Madaxda Xamar Xaafadda HODAN (Deg.HODAN) Warshadda Caanaha gadaashada, ku fadhya dhul dhan Mitir 27 X 27 - SOHDINTIISA:

- 1- BARI Collonello Abuukar,
- 2- GALBEED Jid
- 3- KONFUR Jid
- 4- WAQOQYI Jid

Wakiilka waxaa la siiyey awood buuxda ah inay Maamusho, Kireysato, ka Saari karto dadka guriyaha ku jira, Dayaetiri karto, tibin karto, haddii dood iyo dacwo noqoto qaabili karto, Qarsen ii Magacaabi karto, iyadoo Mataleyso Magaceyga iyo Mas'uuliyaddeyda meesha aniga ka maqan.

Wakiilka way aqbashay Xil gudashada oo waafaqsan Sharciga Islaanka iyo qaynuunka.

CADDEEYEB MILKIILAHA GURIGA
SAGIID CUSMAAN AADEN


AQBAL AHAAN WAKIILKA
MARIYAN CALI XAAJI

MARKHAATIYAAL :

- 1- MOXAMED DIRIYE GUULEED
- 2- CABDULLAHI CALI GUULEED
- 3- MOXAMED CIIMI (INDHA MALEH)

NABSHAD SHUL U DEYAHAY JABLO CABDIRAXMAN MAXAM
MAXAMUUD, KA YAALA DEGMAA HODON EE MUQDISH

1:2000



11-10-80

WARSHADDA CA



Ujeeddo : SUGITAAN MILKIYAD DHUL IYO U SAMAYN DUKUMINTI DUPLICATO
Maanta oo ay taariikhdu tahay 09-07-2019, waxaa Maxkamadda horteeda yimid labada markhaati ee kala ah :-

- 1) Maxamed Nuur Diiriye
- 2) Maxamed Axmed Aadan

Soomaali ah Dagan Xamar
Soomaali ah Dagan Xamar

Dhaar kadib waxay Maxkamadda horteeda ka caddeeyeen in **Saciid Cismaan Aadan** uu leeyahay Dhulka ku yaal Degmada Hodan , Cabirkiisu yahay 27x27 729MQ, laguna baahiyay Faafinta Rasmiga ah ee Jam. Soomaaliya Lr. N.1 r 8 ee soo Baxday 19- Agoosto 1983, Sanadka 1983- Bag 510 Haddaba, Maxkamadda Gobolka Banaadir, waxay sugaysaa in in **Saciid Cismaan Aadan** leeyihiin Dhulka Tilmaamihiisu kor ku xusan yihiin, loona sameeyo Dukuminti Duplicato ah ee Waafaqsan Dukumintigii Asalka ahaa ee lumay kuna soo Baxa **Saciid Cismaan Aadan** , waxayna Maxkamadda u cuskatay Sugitaankan Caddeymaha Dukumintiyada kor ku xusan iyo Markhaatida la horkeenay Maxkamadda, Waana Sugitaan Milkiyad Dhul ansax ah oo waafaqsan sharciga islaamka iyo qaanuunka dalka.

F.G : haddii dhulkan dacwo ka taagan yahay ama dukumintigiisu uusan lumin warqaddani waa waxba kama jiraan.

Dr. Muuse Macalin Maxamed Axmed
GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANAADIR



Email: maxkamadda.gb@gmail.com , mmmacalin114@gmail.com

Tell: +252 613354730

Address :HQ Office, H.Weyne District, London Road , Mogadishu, Somalia

IIB MA GALO

FAAFINTA



RASMIGA

الرسومية

الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 19 Agoosto 1983 L. 1 r 8

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S. QIIMADU Waa 5 Shan lambar walba—RUKUNKA: Sannadii waa Sh. So. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Sh. So. 300 Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wu xuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa 2 laba lh. Rukunka & qorista nka waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmi ga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Kafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

E O O B N I I N

QAYBTA

KOOWAAD

S H A R C I

W. M.

QAYBTA

LABAAD

X E E R

W. M.

QAYBTA

SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM

WASAARADDA H. GUUD, 7.2.81, Naado Dhul Jaalle Saciid Cismaan Aadan L. 317

BOG. 510

WASAARADDA H. GUUD, 7.2.81, Naado Dhul Jaalle Faaduma Abuukar Ibraahim L. 318

» 511

WASAARADDA H. GUUD, 7.2.81, Naado Dhul Jaalle Xuseen Maxamed Maxamuud L. 319

» 512

Wakaaladda M. Qaranka

Handwritten notes:
Buuqa Kala Suqa Habsay
Kafiska Damayqulal
9/7/01P

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYN.

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saciid Cismaan Aadan uu u soo qortay Arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 1.8.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Hodan Qaabkiisuna yahay AFAR GEES Addimihiisuna yihiin 27X27 kuna fadhista 729/= Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Lenin

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynayaa dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 7 Feb. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

Xaaji Maxamed Maye

deg. Hodon
scale: 1:2000

wārshadda -
loL mādā



Duuliyee - save
guuliyee

Duuliyee - save
guuliyee

qur'ānna
Tannāna

wārshadda
caannāna

wadda
LiiNiiN



262
=


FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 10/11/2022

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed Siyaad** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Daahir Cali Jimcaale** oo ka Wakiil ah Loo Waqfe **MASJID BAYTULLAAH** Dukumiintiga **Original** Waqafka Dhulka ee **Rep No. 414/W.P.N/22, Tr. 09/11/2022**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Waqfaha	MASJID BAYTULLAAH
Cabirka	27X27
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Hodan
Lotto Lambar	89,90,91,92-
W.M.L	44849/93, Tr. 24/12/1993 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
Taariikhda Waqafka	09/11/2022
La Socoto	<input checked="" type="checkbox"/> Wasaarada Maaliyadda <input checked="" type="checkbox"/> Dowladda Hoose

Aniga oo ah **Daahir Cali Jimcaale**, Leh Tel No. **0613366060**, Degan **Muqdisho** ahna Waqfaha Dhulkaan Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Dhulka faah faahintiisu Sare ku cadahay uuna leeyahay **MASJID BAYTULLAAH**.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed Siyaad

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Daahir Cali Jimcaale